



Help Me Grow waa nidaam taageerooyin ah oo loogu talagalay haweenka xaamilada ah, daryeelayaasha haya dhallaanka cusub, iyo qoysaska ay u joogaan carruurta yaryar ee qaba dib u dhacyada iyo naafooyinka korriinka.



Ma tahay xaamilo ama guriga ma ku xannaaneysaa dhallaan cusub?

Booqashada Guriga waa barnaamij iskaa ah, oo guriga ku saleysan oo qoysaska lagu siiyo si bilaash ah. Booqdayaasha guryaha waxay adeegsadaan qaab naxariis leh oo waalidiinta ku awood siiya xirfado, aalado, iyo kalsooni si ay u kobciyaan koritaanka caafimaad ee canugga illaa sannadaha ugu horreeya - taasoo ah waqti kobcid oo muhiim ah.

MAXAAD KA FILAN KARTAA?

Booqdayaasha guryaha waxay qoysaska ku xiraan ilaha ka caawinaya baahiyaha aasaasiga ah; waxay ooga jawaabaan su'aalaha ku saabsan waalidnimada iyo caafimaadka dhallaanka; waxayna siiyaan macluumaadka iyo baaritaanada lagu taageerayo uur caafimaad qaba iyo carruurnimada hore.

FAA'IIDOOYINKA BOOQASHADA GURIGA:

Booqashada guriga waxaa loo tagaa in kor loogu qaado natiijooyinka caafimaadka ee labadaba haweenka xaamilada ah iyo dhallaanka, xoojinta cilaqaadka u dhexeeya waalidka iyo dhallaanka, iyo kordhinta u diyaarsanaanta iskuulka.

Ma ka walaacsan tahay koritaanka canugga? Goor hore wax ka qabo!

Barnaamijka Barbaarinta Caruurta wuxuu taageeraa qoysaska ay u joogaan carruurta da'doodu ay u dhaxeyso dhalashada ilaa saddex jir ee qaba dib u dhacyada ama naafooyinka koritaanka si markaa ay u helaan bilowga ugu wanaagsan ee nolosha. Haddii aad ka walaacsan tahay in canug laga yaabo inuu qabo dib u dhac koritaan ama naafo, waxaa muhiim ah in loo gudbiyo barnaamijka Barbaarinta Caruurta goor horeba sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah.

MAXAAD KA FILAN KARTAA?

Xirfadlayaasha barnaamijka Barbaarinta Caruurta waxay la shaqeeyaan qoyska canugga si ay u aqoonsadaan awoodaha iyo baahiyaha waxna uga qabtaan walaacyada korriinka goor horeba sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. Adeegyada waxaa laga bixiyaa halka qoysaska ay ku nool yihiin, ku ciyaaraan, kuna qaataan waqtigooda maalinta.

FAA'IIDOOYINKA WAX KA QABASHADA HORE:

Barbaarinta Caruurta waxay wax ka qaban kartaa dhammaan walaacyada korriinka oo dhan. Taageero hore waxay hoos u dhigi kartaa baahida loo qabo adeegyada dambe ee nolosha.